



Maalgelinta Daymeed ee Maajo 2017-ka ee Yareynta Kiimikada Radon

Iyada oo la raacayo xeerka Maalgelinta Daymeed ee Maajo 2017-ka ee Caafimaadka iyo Badbaadada, lacag ka yara badan 1.1 milyuun oo doolar ayaa la helayaa si loo yareeyo heerarka kiimikada radon ee ka jirta Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Shaqada Yareynta Kiimikada Radon Way Socotaa

Dhowr mashaariicda yareynta kiimikada radon ayaa la bilaabay ka hor maalgelinta daymeed ee Maajo 2017-ka iyada oo la isticmaalayay dhaqaalaha degdega oo laga helayay degmada. Dhowrkii bilood ee la soo dhaafay shaqaaluhu waxay sameeyeen horumar la taaban oo ah yareynta kiimikada radon kuwaasi oo ka socday goobaha dhibaataadu ka jirto ee degmada oo dhan.

Tijaabada loogu talagalay Kiimikada Radon waxay Bilaaban tahay 2016-kii

PPS waxay tijaabada loogu talagalay kiimikada radon bilowday gu'gii 2016-kii si ay ugu hoggaansanto sharciga gobolka, kaasi oo waajibaad ka dhigaya in tijaabada kiimikada radon laga sameeyo dugsiga kasta oo dadweyne muddo aan ka dambeyn 2021-ka. PPS waxay ku dhammeystirtay shaqadeedii tijaabada waqti aad uga horeeya waqtigii gobolku u qabtay.


PPS waxay dib u tijaabin doontaa shan sano oo kasta

Sida waafaqsan nidaamyada Maamulka Caafimaadka Oregon, dhammaan fasallada dabaqa hoose ee isla hadaba wax lagu dhigto ee ku yaala dugsiyada ee la yareeyay kiimikadii radon ee jirtay waxaa dib loo tijaabin doonaa shan sano oo kasta.

Khatarta aan la Arki karin

Kiimikada radon waa mid si dabiici ah u dhacda oo ah gaas radioactive ah oo aadan arki karin, urin karin ama dhadhamin karin. Waxaa jirta kiimikada radon oo heerkeedu sareeyo oo ah mid si dabiici ah u dhacaysa oo ka jirta dhowr goobood oo guud ahaan ka tirsan Portland. Kiimikada radon waxay raacdaa carrada waxayna gashaa dhismayaasha, sida guryaha, dugsiyada iyo goobaha shaqada.

Haddii in la yareeyo loo baahdo - nidaam dhuun hawadu marto oo leh marwaxad ayaa la dhisaa. Nidaamku wuxuu kiimikada radon kor uga soo qaadaa dhismaha hoostiisa iyada oo hawadu sii marayso saqafka halkaasi oo badbaado leh loogu kala diro hawada dibadda.



Dugsiyada Dadweynaha Portland waa kuwo taageera dadka laga tirada badan yahay iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay.